

WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU
WAA GEESIYAAL: ILAALINTA
CARUURTEENA XILLIYADA
DHIBAATADA.



World Health
Organization

unicef 
for every child



UNHCR
The UN Refugee Agency



UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime



End Violence
Against Children



WWO
WORLD WITHOUT ORPHANS



Maestral. 
Changing
THE WAY WE
care



Child Protection
Global Protection Cluster

WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



KA WAR HAY NAFTAADA SI AAD U TAAGEERI KARTOCARUURTA

- Marka walbahaarku aad kuugu bato, naftaada waqti la qaado
- Dhegayso sida ay neeftaada u baxayso ee u soo gelayso jidh kaaga
- Waxaad gacanta saari kartaa calooshaada oo waxaad dareemi kartaa siday kor ugu kacayso ee hoos ugu degayso markaad neefsanayso.
- Dabadeed neeftaada muddo iska dhegayso.

Isku day tan inaad sameeyso maalin kasta. Cajiib ayaad tahay



WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



QAABAB DHAB AH OO INNAGA CAAWINAYA LA QABSASHADA

- Xataa marka ay (noloshu) u muuqato mid qallafsan, isku day inaad hawlo maalinle ah lahaato.
- Hawlaha caadiga ah caruurta badbaado ayay dareensiyaan. Haddii aad awooddo, qabo hawlo maalinle ah sida cunto sameyn ama ka shaqeynta casharada dugsiga.
- Inaad caawiso qof kale waxay sidoo kale ku dareensiin kartaa si fiican. Carruurteenu waxay innaga bartaan deganaanta iyo naxariista.



World Health
Organization

unicef 

for every child



UNHCR
The UN Refugee Agency



UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime



WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



KA CAAWI CARUURTA INAY LA QABSADAAN DHIBAATOYINKA

- Waxaa laga yaabaa inay caruurtu cabsadaan, jaahwareeraan ama cadhoodaan. Waxay u baahan yihiin taageeradaada.
- Dhegayso carruurta marka ay kula wadaagayaan sida ay dareemayaan.
- Aqbal sida ay dareemayaan oo sii kalsooni.
- Daacad noqo laakiin isku day in aad niyad samaato.
- Fiid kasta, naftaada iyo carruurta wax ku ammaan.



WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



5 DAQIIQO OO WAQTI WANAAGSAN AH OO AAD CARUURTAADA LA QAADATO

- Waydii carruurta waxay jeclaan lahaayeen inay sameeyaan.
- Dhegayso, oo soo fiiri dhankooda.
- Niyadaada si buuxda ugu soo jeedi. Inaad maalin kasta la ciyaarto oo la hadasho waxay caruurta dareensiisaa ammaan.



World Health
Organization

unicef 

for every child



UNHCR
The UN Refugee Agency



UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime



WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



LA QABSIGA DIIQADDA, CARADA IYO XANAAQA

- Raadi qof aad kala hadli karto sida aad dareemayso.
- Miyaad xanaaqdaa? Naftaada nasi/haki 10 ilbiriqsi.
- Si tartiib ah u neef-tuur oo u neef-qaado shan jeer. Dabadeed isku day inaad si deggan u jawaabto. Ku faan naftaada mar kasta oo aad tan isku daydo.



WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



WAXYAABO YARYAR AYAA CARUURTA BADBAADIYA

- Caruurta la sameyso qorsheyaal ku saabsan qaababka ilaalinta badbaadadooda.
- Isku day inay caruurta la joogaan waalidiinta, qoyska ama asxaabta aad aaminsan tahay.
- Wada jir u qorsheeya waxaad samayn lahaydeen haddii aad kala maqan tihiin/ ama kala luntaan
- Inaad qorshaynta caruurta la sameysaan ayaa sidoo kale ka caawinayso inay dareemaan amni.



World Health
Organization

unicef 
for every child



UNHCR
The UN Refugee Agency



UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime



WAALIDKA IYO DARYEELAYAASHU WAA
GEESIYAAL: ILAALINTA CARUURTEENA
XILLIYADA DHIBAATADA.



DHISIDDA AWOODDA CARUURTA XILLIYADA DHIBAATOYINKA

- Ka dalbo caruurta inay kaalmo ka geystaan hawlaha goyska.
- Ku ammaan caruurta inay wax isku dayeen ama si fiican u qabteen.
- Tani waxay ka caawin doontaa inay waxyaabo wanaagsan sameeyaan mar kale.
- Ammaantu waxay caruurta u muujisaa inaad danaynayso oo daryeelayso.

